


Hay'adda Istaatistikada Qaranka (HIQ)



**TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA**

**Agoosto 2021**

## Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Agoosto 2021 ayaa ahaa 125.19, marka la barbardhigo 126.89 bishii Julaay 2021.

Isbedel bileedka, Agoosto 2021, marka la barbar dhigo Julaay 2021, ayaa hoos u dhacay -1.34 boqolkiiba. Tan ayaa imaanaysa, marka labarbardhigo hoos u dhac bille ah oo gaaraya 0.73 boqolkiiba bishii Julaay 2021. Sare u kaca bileedka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha **Dharka & Kabaha** (+4.70 boqolkiiba). Sare u kaca dharka iyo kabaha ayaa inta ugu badan ka yimid qiima kororka dharka (+7.49 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka caruurta (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Agoosto 2020 iyo Agoosto 2021) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB uu hoos u dhacay 4.24 boqolkiiba, Marka la barbardhigo 4.76 boqolkiiba ee 12kii bilood (Julaay 2020 iyo Julaay 2021).

### Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Agoosto 2021 (Dec 2014 = 100)


| Tusaha Sicirka Badeecadaha, Agoosto 2021                 |        |
|--|--------|
| Tusaha bishan (Agoosto 2021)                             | 125.19 |
| Tusaha bishii hore (Julaay 2021)                         | 126.89 |
| Tusaha sanadkii hore (Agoosto 2020)                      | 120.09 |
| Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %                         | -1.34% |
| Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba % | 4.24%  |

#### Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

#### Tixraca TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12bilood

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Agoosto 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Agoosto 2021

### Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Agoosto 2021

Heerka sicir-bararka bisha Agoosto 2021 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Agoosto 2020 iyo Agoosto 2021.

**Dhammaan qeybaha TSB** ayaa hoos u dhacay 4.24 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Agoosto 2020 iyo Agoosto 2021, marka la barbardhigo 12kii bilood ee Julaay 2020 iyo Julaay 2021 uu ahaa 4.76 boqolkiiba.

**Dhammaan qeybaha TSB isbedelka** billaha ah ayaa hoos u dhacay -1.34 boqolkiiba bisha Agoosto 2021, marka labarbardhigo sare u kac dhan 0.73 boqolkiiba bishii Julaay 2021.

### Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Agoosto 2021.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

**Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhac -1.34 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Agoosto 2021 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya 1.35 boqolkiiba bishii Julaay 2021. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada quutul daruuriga ah oo qiimahoodu sare u kacay. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa kordhay 5.91 boqolkiiba Agoosto 2021. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -4.72 boqolkiiba Julaay 2021.

**Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa laga dareemay hoos u dhac bille ah oo dhan -3.79 boqolkiiba intii lagu guda jiray Agoosto 2021, marka la barbardhigo sare u kac gaaraya 0.96 boqolkiiba bishii Julaay 2021. Sare u kac sanadlaha ah ee bisha Agoosto 2021 ayaa gaaray -1.28 boqolkiiba.

### Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Agoosto 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Agoosto 2021 (Dec 2014 = 100)



### Qeybaha ugu weyn ee sicirkooda Kordhay (+):

- **Dharka iyo Kabaha** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 13.63 boqolkiiba bishii Agoosto 2021. Sare ayaa sababay qiima koror ku yimid qiimaha dharka (+7.49 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka caruurta (+57.78 boqolkiiba).
- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya 11.02 boqolkiiba bishii Agoosto 2021. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid adeega Bukaana socodka oo gaaray (+11.36 boqolkiiba). Sare u kaca ayaa ka yimid adeega Caaafimaadka oo noqday (+58.14 boqolkiiba).
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa sare u kacay 5.91 boqolkiiba, 12 billod bisha Agoosto 2021. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid cuntada ayaa kordhay 6.05 boqolkiiba, sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Saliida iyo Dufinka (+52.46 boqolkiiba) iyo hilibka (+13.46 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 5.57 boqolkiiba Agoosto 2021. Sare u kaca waxaa sababay saameynta shakhsi ahaaneed oo qiimahoodu gaaray (+10.95 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha tima hagaajinta dumarka saalonka iyo qurxinta Aroosyada (+12.39 boqolkiiba).
- **Hawo bedelashada & dhaqanka** ayaa sameeysay sare u kac sanadle ah oo gaaraya 5.29 boqolkiiba Agoosto 2021. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid maqal-araga, sawirada iyo agabka lagu soo saaro warbixinada oo gaaray +6.21 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid cable TV (+11.11 boqolkiiba) iyo dhalooyinka fidsan (TV-da) +16.67 boqolkiiba.
- **Maqaayadaha iyo hoteelada** ayaa muujiyey sare u kac sanadle ah 5.05 boqolkiiba bishii Agoosto 2021. sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa maqaayadaha, kafateriyada iyo wixii la mid ah (+5.51 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoysaska iyo Dayactirka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 4.21 boqolkiiba ee Agoosto 2021. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Badeecadaha iyo adeegyada qoyska si joogtada ah dayactirka ugu isticmaalo (+11.22 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa muujiyey sicir barar Sanadle ah oo gaaraya 3.32 boqolkiiba bisha Agoosto 2021. Sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa qiimaha Iskuulada asaasiga iyo Dugsiga hoose (+12.45 boqolkiiba).

War bixin bileedka bisha **Agoosto 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia


## Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Agoosto 2021 (-)

- **Tubaakada** ayaa sicirkooda sanadlaha ahi hoos u dhacay -17.65 boqolkiiba bishii Agoosto 2021 marka la barbardhigo hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -6.30 boqolkiiba bishii Julaay 2021. hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Narcotics (-29.03 boqolkiiba).

## B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya TSB -da

### Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Agoosto 2021

(Dec 2014 = 100)



## Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Agoosto 2021 (+)

- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda bilaha ahi sare u kacay 4.70 boqolkiiba bishii Agoosto 2021 marka la barbardhigo 0.00 boqolkiiba bishii Julaay 2021. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka (+7.49 boqolkiiba).

## Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Agoosto 2021 (-)

- **Tubaakada** ayaa sicirkooda bilaha ahi hoos u dhacay -11.94 boqolkiiba bishii Agoosto 2021 marka la barbardhigo 0.00 boqolkiiba bishii Julaay 2021. hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Narcotics (-21.94 boqolkiiba).
- **Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah -3.79 boqolkiiba bishii Agoosto 2021, marka la barbardhigo 0.00 boqolkiiba bishii Julaay 2021. Hoos u dhaca waxaa ka qeyb qaatay kirada Guryaha oo gaaray (-6.04 boqolkiiba).

## Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Agoosto 2021 ee habka (COICOP)

| Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP | TSB Weight | Agoosto 2020 TSB | Julaay 2021 TSB | Agoosto 2021 TSB | % Boqolkiiba Bishan iyo Bishii hore | % Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan |
|---------------------------------------|------------|------------------|-----------------|------------------|-------------------------------------|--|
| <b>Dhamaan qeybaha TSB</b>            | 100.00     | 120.09           | 126.89          | 125.19           | -1.34                               | 4.24   |
| Cuntada & Cabitaanada caadiga ah      | 46.04      | 120.32           | 129.24          | 127.43           | -1.40                               | 5.91   |
| Tubaakadda                            | 1.25       | 137.35           | 128.44          | 113.10           | -11.94                              | -17.65   |
| Dharka & Kabaha                       | 5.03       | 143.37           | 155.60          | 162.91           | 4.70                                | 13.63  |
| Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska   | 23.41      | 115.47           | 118.49          | 114.00           | -3.79                               | -1.28  |
| Agabka Guryaha                        | 2.93       | 108.96           | 113.55          | 113.55           | 0.00                                | 4.21   |
| Caafimaadka                           | 5.00       | 145.16           | 161.16          | 161.16           | 0.00                                | 11.02  |
| Gaadiidka                             | 3.77       | 110.83           | 110.54          | 110.54           | 0.00                                | -0.25  |
| Isgaarsiinta                          | 2.80       | 101.31           | 103.03          | 103.03           | 0.00                                | 1.70   |
| Hawo bedeleshada & dhaqanka           | 1.00       | 98.54            | 103.75          | 103.75           | 0.00                                | 5.29   |
| Tacliinta                             | 4.00       | 106.27           | 109.80          | 109.80           | 0.00                                | 3.32   |
| Maqaayadaha & Hoteelada               | 2.00       | 136.61           | 143.51          | 143.51           | 0.00                                | 5.05   |
| Alaabaha yaryar & Adeegyada           | 2.77       | 119.06           | 125.69          | 125.69           | 0.00                                | 5.57   |

### Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


### Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Sebteembar 2021 waxaa la baahin doonaa 15 Octoobar 2021. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

**Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Agoosto 2021 marka loo eego COICOPka**

**Dhamaan qeybaha TSB-da**

Qeybaha ka qeybqata (%) heerka sicir bararka ( COICOP)



Isha xogta: NBS

**Lifaaqa 1aad** wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadsooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Agoosto 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia